

HABRAACA MAAMUL

Hay’adaha dadwayne waxa waajib ka saaran yahay inay bixiyaan macluumaadka kusaabsan xuquuqda iyo habraaca dalabka. Waxa khasab ah inay u gudbiyaan dadka hay’adda saxda ah, halka ay daruuriga tahay, waxa khasab ah sidoo kale inay caawimo siiyaan fayl garaynta dalabka. Warqadda go’aanku waa inay u sheegayso helaha in go’aanka ay dhici karta in rafcaan laga qaato, oo ay sheegaysana wakhtiga kama-dambaysta ah iyo habraaca rafcaanada. Haddii aad rabto, xafiiska diiday dalabkaaga ayaa kaa caawin Karin inaad qorto rafcaan.

ISKU-XIDHKA BULSHADA / KOOXAHA WAALIDKA

La kulanka waalidiinta kale ee xaaladdaada oo kale kujira sida badan aad bay u fiican tahay. Waxa jira koox hawl gaar ah kuwaasi oo si gaar ah uga shaqeeyoa inay caawiyaan dadka leh naafooyinka shaqeed. Kooxahani sida badan waxay siiyaan siminaarro waalidiinta. Tusaale ahaan, Bufdir wuxuu bixiyaa koorso loo yaqaan “Hva med oss” (Bal innagana)? Kani waa siminaar loogu talogalay waalidiinta haysta carruur leh awoodo shaqeed oo dhiman.



Waxa ugu muhiimsan adiga, iyo annaga, waa in qoyskaagu caafimaad qabo Ha ka waaban inaad na waydiiso wax kasta – waxaanu heegan u nahay inaanu ku caawino!

Linkiyo caawimo leh:

Bufdir.no
Helsedirektoratet.no
Nav.no

Barne-, ungdoms- og familiedirektoratet

Barne-, ungdoms- og familiedirektoratet

CARRUURTA OO DHAN WAXAY XAQ U LEEYIHIIN BARBAARIN FIICAN

Buug-yar loogu talogalay qoysaska leh carruurta leh awoodaha shaqeed

Carruurta oo dhan waxay xaq u leeyihiin barbaarin fiican; inay ciyaaraan, inay bartaan iyo inay kaqayb noqdaan bulshada. Carruurtu waxay leeyihiin baahiyo kala duwan, carruurta oo dhana midba waa si'. Carruurta qaar waa arag laayihiin. Qaar kale waa dhago laayihiin. Qaar waxay leeyihiin naafonimo jidheed, halka qaar kalena ay leeyihiin naafonimo garasho. Qaar kale waxay waajahaan dhibaatooyin bulsho ama nafsi – halka qaar kale ay la nool yihiin xanuun daba-dheer. Baahiyaha guud ee ilmaha waxa khasab ah in la baadho si loo go'aamiyo haddii ilmaha iyo waalidiintiisu ay mutaysteen taageero, dheefo iyo kaalmo gaar ah.

XUQUUQDA

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay adeegyada ku habboon baahiyihiisa. Adeegyadan waxay ka dalban karaan barbaarinta iyo dugsiyada, ama cusbitaallada, guriga iyo in lagu fududeeyo hawlaha nasashada. Carruurta iyo waalidiintoodu waxa dhici karta inay leeyihiin xuquuq ayna ogayn, sababo badan oo kala duwan awgood. Hay'ado dadwayne oo badan waxay ku siin karaan tilmaam xuquuqahaas.

TARJUMAAN MUCTARIF AH

Waxa aad xaq u leedahay inaad ku hesho macluumaadka luuqadda aad fahmayso. Waxa dhici karta inaad u baahato tarjumaan si aad ula xidhiidho hawlwadeenada daryeelka caafimaad, shaqaalaha barbaarinta, shaqaalaha dugsiga ama marka lala xidhiidhayo NAV ama adeegyada kale ee caafimaad iyo daryeel. Qoysku wuxuu xaq u leeyahay kaalmada tarjumaan muctarif ah marka uu la xidhiidhayo adeegyadan. Shaqada tarjumaanku waa inuu u sahlo adiga iyo qoyskaaga inaad fahamtaan waxa shaqaalaha adeegyadan ay bixinayaan iyo inay shaqaaalaha u sahlaan inay fahmaan adiga iyo ilmahaaga.

QORSHAHA QOF AHAANEED IYO ISU-DUWAHA

Carruurta u baahan daryeel caafimaad oo abaabulan oo muddo dheer iyo adeegyo daryeel oo kale waxa la siin doonaa qorshe qof ahaaneed ("individuell plan") si loo maareeyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha. Ujeedada qorshuhu waa in la siiyo adeegyo dhammaystiran, abaabulan oo qofkana ku habboon iyo in la hubiyo in xirfaddu tahay masuuliyadda ugu wayn la-socodka iyo abaabulka mar kasta. Qorshaha qof ahaaneed la samayn maayo haddii aanu waalidku oggolaan. Halka baahidu jirto muddo dheer muddo dheer iyo adeegyada abaabulan, dawladda hoose waxa khasab ah inay siiso qoyska isu-duwe ("kordinator") xiitaa haddii bukaanku ama isticmaaluhu diido inuu yeesho qorshe qof ahaaneed.

AALADAHA CAAWINEED

Ilmahaagu waxa dhici karta sidoo kale inuu xaq u leeyahay aaladaha caawineed ("hjelpemidler"). Kuwan waxa loogu talogalay inay ka caawiyaan ilmaha dhexgalka bulshada iyo koboca shakhsiga. Aaladuhu sidoo kale waxa dhici karta inay daruuri u yihiin tabobarka, carinta, kaqaybqaadashada iyo ciyaarta.

QORSHAHA DARYEELKA KUMEEL GAADHKA AH

Daryeelka kumeel gaadhka ah ("avlastningstiltak") waa qorshe loogu talogalay dadka siiya daryeel baaxad leh qof baahi wayn oo daryeel. Ujeedadu waa in loo fududeeyo bixiyaha daryeelka. Daryeelka kumeel gaadhak ah waxa la bixin karaa dhawr saacadood maalmo cayiman ama wakhtiga daryeel kumeel gaadh ah oo laga dhigo maalinta iyo habeenkeeda oo dhan. Waxa khasab ah inuu nidaamsanaado intii suurogal ah iyadoo la raacayo rabitaanka qoyska. Daryeelka kumeel gaadhka ah waxa khasab ah in la dalbado dawladda hoosena waxay qiimayn doontaa xadka iyo waxa kujira kahor gaadhista go'aankan.

QOFKA TAAGEERO

Qofka taageero ("støttekontakt") waa qof ay mushaharka siiso dawladda hoose si uu uga caawiyo qof kale inuu ku raaxaysto nolosha bulshada iyo wakhti nasasho oo macne leh. Hawlaha waxa kamid ah noqon kara booqashooyin guriga, u raacista qofka maqaaxida, shaneemada, riwaayadaha, dhacdooyinka isboorti iyo hawlaha kale ee bulsho.

KAALMADA SHAKHSIGA EE ISTICMAALUHU MAAMULAYO (BPA)

Waxa dhici karta inaad xaq u leedahay kaalmada tooska ah, caawimo ka timaad kaaliye nololeed iyo/ama fudaydin nidaamsan adigoo maraya waxa loo yaqaan kaalmada shakhsiga ee qofku maamulayo ("brukerstyrt personlig assistent"- BPA) . BPA waxa loogu talogalay inuu siiyo dadka u baahan kaalmada fursad inay ku noolaadaan nolol firfircoon oo madaxbannaan. Ujeedadu waa in isticmaalaha awood loo siiyo inuu gaadho nolol tan ugu firfircoon uguna madaxbannaan ee suurogal ah. Maamulka uu ku isticmaalayo isticmaaluhu kaalmada la siiyey waxay qaabaysaa aasaaska qorshahan. Tani waxay ka dhigan tahay in isticmaaluhu uu horjooge ka yahay kaalmadiisa, bixiyo tilmaan oo go'aamiyo halka, goorta iyo hawlaha kaaliyuhu ay tahay inuu qabto. Tani sidoo kale waxay ku lug leedahay ku tabobar iyo ku hagis kaaliyayaasha sida caawimada loo bixinayo iyo diyaarinta jadwallada shaqada iyo xaadirista arrimaha kale ee la xidhiidha adeegyadan. Carruurta yaryar awoodi maayaan inay maareeyaan kaalmada shakhsiga nafahooda waxayna noqon inay matalaan waalidiintoodu (ama wakiilku).

MAGDHAWGA DHAQAALE

Dhantaalnaata shaqeed ama xanuunada daba dheer waxay ku keenaan kharash dheeraad ah waalidiin badan. Waalidiintu waxa dhici karta inay xaq u leeyihiin taageerada dhaqaale mid kamid ah qorshayasha dheefta NAV, ama dawladda hoose. Si loogu magdhabo khasaaraha dakhliga ay kasbadeen, waalidiinta shaqeeyaa waxa dhici karta inay xaq u leeyihiin dheefaha daryeelka. Qorshaha caymiska qaranku sidoo kale wuxuu u magdhabi waalidiinta haysta carruur naafo ah, isagoo adeegsanaya qorshaha dheefta aasaasiga ah ama qorshaha dheefta daryeelka.

Dheefaha aad heli karto waa:

- Dheefaha aasaasiga ah
- Dheefaha dheeraadka ah
- Dheefaha dheeraadka ah ee la kordhiyey
- Dheefaha daryeelka
- Gunnada imaanshaha
- Gunnada tabobarka
- Haddii waalidiinta, wakiilada ama qaraabadu qabtaan shaqo daryeel oo si gaar ah culays u leh, sidoo kale waxay ka dalban karaan dawladda hoose waxa loo yaqaan mushaharrada daryeela (omsorgslønn).